

Xeer Madaxweynaha Jamhuriyadda lamba. 6 ee 9 Janaayo 1967

Xeerinka qiimaha siinta dhulka demaniyaal ee loogu tala gala dhismaha eek u yaala Muqdishu

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay faqradda 2 ee qod. 77 iyo 83 ee ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay sharciga lamba. 1 ee 7 Febaraayo 1965 wax ka bedeelka Sharciga lamba. 14 ee 3 Juun 1962 ee la xiriira xeernidamiya Dowladda;

Kadib markii la tixraacay qiimaha dhulka ku yaalaya aaga ilaa iyo muddada lagu arkay in qiimaha uu sare u kacay dhismaha ee sanooyinka soo socda;

Kadib markii la garowsaday in dib la isugu soo celiyo qiimaha dhulka iyo tirada boosaska la bixiyo sida ku cad sharciga lamb 144 ee 23 Maay 1961;

Kadib markii la tixgeliyey fursadaha bixista boosaska laga dhigi doono warshadaha iyo ganacsiga si loo dhiiri geliyo horumarinta warshadeynta Dalka;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiirka;

Kadib markii la tixgeliyey Wasiirka Howlaha Guud;

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Qiimaha dhulka loogu tala galay dhismaha loogu tala si gaar loo helo waxaa loo beddelo sida hoos ku tilmaaman ee ku xiran qorshaha oo uu ka mid yihiin dekreetadan:

1. — Aaga Dhexe qiimaha	Sh.	So.	30,00;
2. — Aaga Dhexe ee meel ku gaarka	“	“	“ 20,00;
3. — Aaga Dhexe	“	“	“ 10,00;
4. — Aaga Konfurta	“	“	“ 4,00;
5. — Aaga Dhexe ee meel gaarka	“	“	“ 3,00;
6. — Aaga Bananka ku yaal	“	“	“ 1,50;
7. — Aaga Bananka ee meel gaarka	“	“	“ 1,00.

Qod. 2

Xad boos kasto waxaa loo qondeeyo sida hoos ku qoran:

	Ugu	Yar	Ugu	Badnaan
Aaga Dhexe	mq	400	mq	2.000;
Aaga Dhexe ee meel ku gaar	“	400	“	2.000;
Aaga Dhexe	“	400	“	2.000;
Aaga Dhexe ee sub	“	300	“	3.000;
Aaga Bananka	“	300	“	3.000;
Aaga Bananka ku meel gar	“	300	“	3.000;
Aaga Dibedda	“	300	“	3.000.

Amarradda ku qoran Dekreetada oo la xiriira ballarinta booska laguma dabaqi karo kadib codsiga ogeysiiska uu dhexeeya ilaa iyo intii qof ay hor istaag loogu suubin.

Qod. 3

Boosaska dhismaha loogu tala galay warshadaha ma hoos tegi doonaan amarrada ku qoran qod. 1 iyo 2 Qiimaha guud iyo baxaadda waxaa la qondeyn

doona go'aan Wasiir iyadoo la tixgelinaya nooca warshadda iyo qaabka dhismaha la rabo in laga dhiso.

Bixinta boosaska loogu tala galay warshadaha-ganacsiga waxaa ku xiran marxaladahaan:

- a) in la caddeyo nooca warshadda ama howlaha ganacsiga ee la rabo in la fuliyo;
- b) in la muujiyo maaliyada ee ku bixi doona dhismaha mashruucaan;
- c) so bandhigga hordhac ah ee mashruuca dhismaha la rabo in la fuliyo muddada loogu tala galay;
- d) Fassaxa hordhaca ah ee Wasiirka Warshada iyo Ganacsiga.

Qod. 4

Dekreetadani waxay hirgeli doontaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda;

Boosaskii la bixiyey ka hor sharcigaan intii aysan dekreetadan hirgelin waa kuwa jira si sharci ah, laakin waxaa la xaddidi doono dhulka dhismaha oo waqti la mucaaradi karo ay weli jirto intii aysan dekreetadan hirgelin waxaa lagu dabaqi doona amarradan.

Qod. 5

Waxaa la aqoonsaday dhulalkii la bixi qaab warshadeed ama ganacsig oo Guddiga Teknika Canshuuraadka oo qiimaha dhulka horay loo shubay iyadoo shardi ah in la habsaday in shuruudaha oo idil la dhameeystiray.

Amarrada ka soo horjeeda dekreetadaani waa la buriyey

Muqdisho, 9 Janaayo 1967.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Howlaha Guud

Dr. Sh. Abdulle Mohamud

La arkay, laguna diiwan geliyey diwaan lamba. 1 bogga 3

Muqdisho, 16 Janaayo 1967.

Xisaabiyaha Guud

Mohamed Ahmed Abdilleh